



Arag markii ugu horreysay naqshadaa garoonka cusub ee kubbadda kolayga



Aragtida farshaxanka ee ku saabsan casriyeynta garoonka kubbadda kolayga

Naqshadahan waxaa lagu saleeyay la tashi lala sameeyay Xarunta Dhalinyarada ee Richmond waxayna ka dhigaysaa barxada mid casriyeysan oo lagu ciyaari karo isla markaasna ammaan ah ayna dad badan heli karaan si ay ugu baashaalaan.

Howlihii shaqada waa la bilaabay waxaana la filayaa in dhameeyo bartamaha sanadka 2026. Fadlan raac calaamadaha ku hagaya markaad goobta ku dhex socoto. Weli dadku waa ay kusii ciyaari karaan garoonka labaad ee ku yaal Elizabeth Street.

Is-diiwaangeli si aad iimayl ugu hesho wixii soo cusboonaado aadna ula socoto halka ay marayaan howlaha shaqada. Iska diiwaangeli homes.vic.gov.au/sign-up

Waxyaabo cusub oo loo sameeyay garoonka

- ✓ Dhulka oo la cusbooneysiin doono
- ✓ Iftiimin la cusboonaysiiyey
- ✓ Meelo la fariisto oo cusub
- ✓ Laymankii garoonka oo la cusbooneysiyyay
- ✓ Wado/marin laga geli karo iyo waddo ballaaran oo laga geli karo garoonka

Nagu xirnoow



Kulamada la isku xog wareysanayo



Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga




Isdiiwaangeli si aad ula socotid wixii soo cusboonaada

Si aad wax kasta ula socoto booqo:



homes.vic.gov.au/richmond-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi Homes Victoria

Soomaali | Soomaali

Maajo 2026



DHISMAHA GURYAHA EE WEYN

Waqooyiga Richmond

Wixii ku soo kordhay Bulshada



Bandhigga Bulshada Waqooyiga Richmond wuxuu ahaa mid aad u wanaagsanaa

Roobku ma uusan joojin damaashaadkii xafladda ee la qabtay bishii Maarso

Howlo shaqo ayaa laga bilaabi doonaa garoonka kubbadda kolayga ee cusub

Eeg aragtida farshaxanka ee garoonka cusub ee lagu ciyaari doono

Howlaha shaqo oo lagu dayactirayo Vere Street

Iskuulka meesha dadka lagu dejiyo lagana qaado oo laga dhigayo meel ammaan ah

Ajak Kwai ayaa madadaaliyay dadkii isugu yimid Xafladda Bulshada ee North Richmond waxaana iska kaashaday BANH iyo Golaha Deegaanka ee Yarra

Wixii ka dhacaya Richmond

Maajo 2026

Meelo dadka lagu dejiyo lagana qaadi karo oo ku taal Vere Street

Meesha dadka lagu dejiyo lagana qaado ee ku taal Vere St ayaa waxaan ka dhigi doonaa meel ammaan ah

Shaqooyinka socdaa waxay meesha laga galo Vere St ilaa Richmond West Primary School ka sii socon doonaan ilaa bartamaha 2026

- Vere St lama geli karo oo waa ay xirnaan doontaa xilligaas ayada ah
- Dadka meesha degan iyo adeegyada gurmada degdega ah inay galaan waa loo oggol yahay
- Meelaha ay dadka ku lugeeyaan waa ay sii furnaan doonaan
- Shaqaale kala hagi doona baabuurta ayaa goobta ku sugnaa doona

72 ilaa 76 Church Street

Howlaha shaqo

- Kormeerista, sugidda, si looga dhigo meel ammaan ah iyo in guryaha la faaruqiya laga saaro waxyaabaha aan loo baahnayn
- Mashiinno yaryar ayaa goobta ooli doona si looga nadiifiyo loogana saaro qashinka

Agagaarka xaafada

Amniga xaafadda oo dhan

- Sameynta furayaal cusub oo goobta lagu geli karo ayaa la bilaabay Eeg waraaqaha ogeysiiska ee darbiga lagu soo dhajiyay si aad u hesho macluumaad dheeraad ah
- Tijaabinta albaabada amniga ee loogu talagalay meelaha dharka lagu dhaqdo ayaa la wadaa
- Kaamirooyinka amniga (CCTV) hadda waa la kormeeraa 24/7 sidoo kalena xaafada oo dhan waxaa laga sameeyaa roondooyin amniga lagu sugayo

Howlo shaqo oo la xiriirta tijaabada carrada

- Laga bilaabo bilowga bisha Maajo ilaa dhammaadka 2026, hawlo shaqo oo lagu baarayo ciidda ayaa dhici doona
- Qaybo yar oo xaafada ka tirsan ayaa silig deyrka lagu wareejin doona si ay ammaan u ahaadaan
- Waxaa laga yaabaa inaad aragto mashiinno yaryar sida kuwa wax lagu qodo iyo kuwa carrada qaada oo yaal meeaha cowska leh mararka qaar

Garoonka kubadda kolayga oo la casriyeynayo

- Sidii looga dhigi lahaa mid lagu ciyaari karo ayaa lagu guda jiraa waxaana la filayaa in howlahaas la dhameystiro bartamaha sannadka

139 Highett Street

Howlaha shaqo

- Muunada yar oo agab ah ayaa laga qaadaya guryaha la faaruqiya

106, 108, 110 iyo 112 Elizabeth Street

Dib u dhiska mustaqbalka

Rakibidda Mukeyfyada/ qaboojiyayaalka ayaa sii socota

Taageerada loogu talagalay dadka guuraya ee degaya guryaha cusub

10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo
Isniinta ilaa Jimcaha
Waqooyiga Richmond
Xarunta Bulshada
110 Elizabeth Street

Elizabeth Street, Anderson iyo meesha kor loogu socdo ee Williams Court

Howlaha shaqo

- In la kormeero, lana sugo ammaanka guryaha laga guuray
- Waxyaabaha aan loo baahneyn oo laga saari doono guryaha la faaruqiya
- Mashiino yaryar ayaa goobta ooli doona si ay qashinka meesha uga nadiifiyaan
- Guryaha la faaruqiya, saqafyada dibadda iyo darbiyada ayaa waxaa laga qaadi doono muunado yar
- Shaqaaluhu waxaa laga yaabaa inay u isticmaalaan wiishash dhismaha dibaddiisa si ay marna kor u tagaan marna hoos u yimaadaan

5 Lewis Court iyo 161 Elizabeth Street

144 guryo bulsho/dowlad oo cusub iyo goobo bulsho

oo la dhameystiray sanadkii 2025 - dadkii kirada ugu jiray ayaa hada ku guuray oo degan



Shaqadayaada waxaa laga saacadaha shaqada ee golaha deegaankaaga:

Isniin ilaa Jimce
inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo

Sabti
inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah hala xidhiidhaan xafiiska guryaynta ee deegaankooda:

1300 598 521

richmond.housing@dffh.vic.gov.au



Mararka qaarkood ogolaanshaha (permit) ay bixiyaan golaha deegaanka ayaa loo baahan yahay si looga shaqeeyo wax ka baxsan saacadahan laakiin dadka goobta degan waan la socod siin doona haddii ay tani dhacdo.



Dhammaan howlaha shaqooyinka waxaa lagu fulin doona heerarka ugu sarreeya ee badbaadada iyo shuruudaha sharciga.

Jadwalka hawlaha shaqo ee dib-u-dhiska

139 Highett Street iyo meelaha kor loogu socdo ee ku yaal Elizabeth Street iyo Williams iyo Anderson Courts

Lama samaynayo dumin inta ay dadku wali degan yihiin dhismeyaalkan.

Waan kuu joognaa

1. Inaad wax badan ogaato oo ay waxkastana ammaan kuu ahaadaan

- ✓ Sugidda guryaha bannaan
- ✓ Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si qalabka loogu maareeyo si amaan ah
- ✓ Joogtaynta dayactirka joogtada ah

Bartamaha-2026

2. Diyaargarowga

- Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- Hubinta isku xirka adeegga
- Meesha laga galo in laga dhigo mid badbaado u ah dadka lugaynaya, baabuurta iyo baarkinka baabuurka
- Wax ka qabashada Dhismaha gudahiisa ayaa shaqo laga hayaa si looga dhigo meel ammaan ah.

2026

3. Duminta

- Rakibaadda biraha wax lagu dhisayo (scaffolding)
- Waxa gudaha ku dhisan in lasoo saaro
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booq: homes.vic.gov.au/information-in-your-language



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

enquiries@homes.vic.gov.au